

Foomka Ogolaanshaha Xiriirada Iimeelka iyo Fariin Qoraalka

Xiriirka Iimeelka iyo Fariimaha Qoraalka

Marka aan saxiixo, waxaan u fasaxayaa shaqaalaha NYFS inay igalasoo xariiraan arimaha caafimaadkayga ayagoo adeegsanaaya boostada (iimeelka) iyo/ama fariin qoraalka (SMS).

Qodobada Muhiimka ah:

- Fariimaha iimeelka iyo fariimaha qoraalka ah ayaan ahayn kuwo qarsoodi ah ama "amaan ah".
- Fariimaha iimeelka iyo fariimaha qoraalka ah waa la badeli karaa ama "la been abuuri karaa".
- Iimeelka iyo fariimaha qoraalka ah ayaa qof kale loo diri karaa adiga oo aan fasixin (si kas ah ama si khaldan). Haddii cid kale loosii gudbiyo, xogta ayaysan intaas kadib difaaci karin xeerarka sirta ee HIPAA.
- Nuqullada kaydka ah ee iimeelka ama fariimaha qoraalka ah ayaa jiri kara xataa kadib marka la tirtiro.
- Iimeelka iyo fariimaha qoraalka ah ayaa laga yaabaa inaan la arkin ama laga jawaabin isla markaba. *Fadlan nasoo wac haddii aad waajahdo cilado degdeg ah.*
- ***Nuqulka dhammaan xiriirada iimeelka iyo fariin qoraalka ayaa lagu daraa qayb kamid ah diiwaanka caafimaadka. Iimeelka iyo fariimaha qoraalka ah ayaa loo adeegsan karaa kiisaska maxkamada haddii xogtu la xiriirto ama aysan la xiriirin baaritaankaaga iyo daawayntaada.***

Codsiga Xusuusinta Fariin Qoraalka ah:

- Waxaan codsanayaa in NYFS ay fariimo qoraallada u dirto aalada moobilka ee aan doortay si ay ii xasuusiso taariikhda iyo waqtiga ay ku aadan yihiin balamahayga mudaysan. Waan fahmayaa in shirkadayda khadka wifi ga ay iga jaran karto qarashka adeegyada fariimahaas.
- Waxaan fahmayaa in NYFS aysan helin jawaabaha laga baxsho fariin qoraallada xasuusinta ah, aanana jawaab ka heli doonin NYFS haddii aan iskudayo inaan ka jawaabo fariin qoraalka xusuusinta ah. NYFS ayaa adeeggaan fariin qoraalka xusuusinta ah u bixisa si loogu fududeeyo macaamiisha.
- Waan fahmayaa in aan u baahan nahay inaan buuxsho Foomka cusub ee Ogolaanshaha Xiriirada Iimeelka iyo Fariin Qoraalka haddii aan doonayno in la igulasoo xiriiro lambar ama iimeel kale.
- Waxaan doonayaa in fariimahayga qoraal xusuusinta ah lasoo diro: **(fadlan tig saar hal god)**
 - LABO MAALMOOD KAHOR
 - HAL MAALIN KAHOR
 - ISLA MAALINTA (Waxaad heli doontaa fariin qoraalka ku dhawaad 4 saacadood kahor balantaada)

Waxaan fahmayaa in NYFS ay wali iga doonayso inaan ogeysiiska joojinta balamaha baxnaaninta yo caafimaadka dhimirka soo diro 24 saac waqtiga.

Xogta Dheeriga ah ee Sharciga

- Waad ka laaban kartaa ama joojin kartaa ogolaanshahaan xili kasta adoo ogeysiiska **qoraalka ah** u diraaya ciwaanka ganacsiga ee Adeegyada Dhalinta iyo Qoyska ee Waqooyi Bari ee hoos ku qoran. Ka laabashadaada ayaan quseyn doonin iimeellada ama fariin qoraallada laguusoo diray kahor intaanaan helin ogeysiiska qoraalka ah.

- Wakiilka gaarka ah (tusaale: masuulka sharciga ah ama waalidka) ayaa saxiixi kara ogolaanshaha kadib marka ay NYFS hesho dukumiintiga awooda siinaaya wakiilka sharciga ah si uu wakiil ugu noqdo macmiilka.

Waxaan fahmayaa (fahmaynaa) xogta kor lagu sheegay waxaana fahmayaa in fariimaha iimeelka ama fariimaha qoraalka ah aysan ahayn qaabab amaan ah oo lagu wada xiriiro. Waan fahmayaa in dhakhtarku diidi karo inuu igula xiriiro iimeelka ama fariin qoraal ayadoo ku xiran nooca xogta caafimaadka. Waxaan u fasaxayaa NYFS inay adeegsato boostada (iimeelka) iyo fariin qoraalka si ay iigalasoo xiriirto arimaha daryeelkayga. Waan fahmayaa in aan ka bixi karo ogolaanshahaan marka aan doono anoo ogeysiis qoraal ah u diraya NYFS.

Ciwaanka Iimaylka Macmiilka: _____

Lambarka Taleefanka Gacanta ee Macmiilka: _____

Magaca Macmiilka (daabacan)

Taariikhda

Saxiixa Macmiilka

Magaca Wakiilka (daabacan)

Taariikhda

Saxiixa Wakiilka

Xiriirka Wakiilka